# Su'aalaha iyo Jawaabaha Inta Badan La Isweydiiyo ee loogu talagalay Qoysaska ka tirsan Qiimeynta Gobolka Oregon oo dhan ee Imtixaan Qaadashada Meesha Fog La Joogo

Ardayda dugsiyada dadweynaha ee Oregon ee dhigata fasallada 3 – 8 iyo 11 ee dugsiyadoodu waxbarashada ku bixiyaan internet-ka, oo degmooyinkoodu go'aansadeen in ay taageeraan bixinta, ayay dhici kartaa in iyaga oo jooga meel fog ay ka qayb qaataan Qiimeyn Wadareedka Oregon ee maadada Luqadda Ingiriisiga (ELA), Xisaabta, iyo Sayniska. Ardayda dhigata K – 12 qaarkood ayaa kaga qayb qaadan doona Qiimeynta Aqoonta Luqadda Ingiriisiga (ELPA) ee Oregon iyaga oo jooga meel fog ''remotely'. Intaa waxa u dheer, in Oregon siiso ardayda fasallada 3 – 12 fursad ay iyaga oo jooga meel fog kaga qayb qaataan Ra'yi-ururinta Horumarinta Sinnaanta Waxbarasho ee Ardayga (SEED) si ay u bixiyaan jawaab celin ku saabsan khibradooda waxbarasho. Ardayda ayaa u baahan kara in ay ku qaataan imtixaanada iyaga oo jooga meel fog haddii qaabkooda aasaasiga ah ee waxbaridu yahay mid internet-ka ama haddii ay ka qayb qaadanayaan dugsi internet-ka wax lagu barto. Imtixaan qaadista waxaa lagu dhammeystiri karaa iyada oo la isticmaalayo nidaam wax lagu kormeero oo la joogo meel fog 'remote' oo qayb ka ah isla nidaamka imtixaan qaadista ee ardaydu u adeegsadaan si ay imtixaanada ugu qaataan si shakhsi ah. Dokumentigan waxa ku jira jawaababha su'aalaha inta badan la isweydiiyo ee ku saabsan imtixaan qaadista meesha fog la joogo.

1. **Imtixaano noocee ah ayuu ilmahaygu u baahan yahay in uu qaato inta uu guriga joogo, oo sidee bayna imtixaanadani ugu faa'iideynayaan ilmahayga?**
   Imtixaan Qaadashada Meesha Fog La joogo ayaa lagu heli karaa mid kasta oo ka mid ah Qiimeyn Wadareedka waxbarashada guud ee Oregon ee dhammaan heerarka fasallada imtixaanka la qaaday oo ay ku jiraan ELPA, Ra'yi-ururinta SEED, iyo Qiimeynta Muddada Kala Duwan leh ee Oregon. Qiimeyn wadareedka waxaa loo adeegsanadaa in uu caawiyo qoysaska, dugsiyada, degmooyinka, iyo gobolkuba in ay fahmaan oo ay horumariyaan guusha waxbarasho ee ardayga. Waxay sidoo kale ka caawiyaan adiga iyo macallinka ilmahaaga labadiinaba in aad fahantaan xirfadaha iyo aqoonta ilmahaagu muujin karo kana caawiyo qorshahooda dugsi ee waxbarida iyo taageerada mustaqbalka.

2. **Maxaan qaban karaa si aan ilmahayga ugu diyaariyo qiimeyn wadareed kasta oo gobolka oo dhan ah oo uu u baahan yahay in uu qaato marka uu wax ku baranayo isaga oo meel ka fog jooga?**
   Tallaabooyinka soo socda ayaa kaa caawin kara in aad hubiso in ilmahaagu diyaar u yahay in uu ka qayb qaato qiimeyn wadareedka gobolka oo dhan ah ee meesha fog la joogo:
   - Kala shaqee macallinka ilmahaaga iyo iskuduwaha tiknoolajiyadda dugsiga si aad u fahanto qorshaha imtixaan qaadashada meesha fog la joogo; si loo hubiyo in ilmahaagu haysto laptop, iPad, ama Chromebook si ku habboon iskugu dubaridan oo dugsigu bixiyo; iyo in aad hubiso in aad haysato gelitaanka internet-ka oo la isku halayn karo iyo bandwidth.
   - Kala shaqee macallinka ilmahaaga si aad u fahamto tiknoolajiyada loogu baahan yahay imtixaan qaadashada meesha fog la joogo. Tusaale ahaan, kambiyuutarka ilmahaaga ayaa u baahan doona hardware-ka soo socda iyada oo ku saleysan imtixaanka uu qaadayo macallinku.
     - Makarafoon
     - Sameecado
     - Webcam
     - Tiknoolajiyada la adeegsado oo kasta oo ilmahaaga u baahan karo ee loogu talagalay helitaanka ku saleysan IEP ama qorshaha 504 (tusaale, shaashad akhriye, hadalka u beddela qoraal, iwm.)

- Kala shaqee macallinka ilmahaaga iyo iskuduwaha tiknoolajiyadda dugsiga si aad u hubiso in aaladda ardaygaagu u leeyahay browser sugan ama nidaamka app-ka telefoonka gacanta 'mobile app' oo loo isticmaalo imtixaan qaadista oo la rakibay iyo in hardware-ka dheeraadka ahi uu si sax ah u shaqeynayo ka hor imtixaan qaadista.
- Ilmahaaga u diyaari meel aamusnaan leh oo aan lahayn waxyaabo ka jeediya hawsha marka la qaadanayo imtixaan la joogo meel fog. Ardayda waa in la xasuusiyaa in macalinkoodu uu arki karo iyaga iyo meelaha u dhow ama gadaashooda isaga oo isticmaalaya webcam-ka.
- Ku dhiirigeli ilmahaaga in uu qabto intii karaankiis ah oo weydiiyo macallinkiisa (ma aha cid kale) su'aalo haddii loo baahdo.
- Xasuusi ilmahaaga in aanu isticmaalin telefoon ama aalad kale sida qaamuuska, thesaurus, ama higgaad saxaha si looga jawaabo su'aal kasta.

3. **Miyuu ilmahaygu qaadan karaa Ku tababarashada Imtixaanka isaga oo joogo meel fog ka hor inta uusan qaadan Qiimeyn Wadareedka waxbarashada guud ee Oregon, ELPA, Ra'yi-ururinta SEED, ama Qiimeynta Muddada Kala Duwan leh ee Oregon isaga oo joogo meel fog 'remotely'?**

   Haa, kala shaqee macallinka ilmahaaga si aad u diyaariso fursad uu ku tababarashada imtixaanka isaga oo jooga meel fog ka hor inta aan la isa siin kulanka imtixaan qaadashada meesha fog la joogo.

4. **Sidee buu ilmahaygu u hubin karaa hardware-kiisa si uu u xaqiijiyo in uu si sax ah shaqeynayo ka hor imtixaan qaadista?**

   Ardaydu waa in ay kala shaqeeyaan macallinkooda iyo/ama iskuduwaha tiknoolajiyada dugsiga in uu sameeyo hubinta ogaanshaha dhibaatada ee laga helayo https://demo.tds.cambiumast.com/systemdiagnostic/pages/default.aspx?c=Cambium si loo hubiyo in hardware-kiisu shaqeynayo. Ka socda website-kani, ardaygu wuxuu awoodi doonaa in uu sameeyo hubinta maqalka, fiidiyowga, iyo isku xirnaanta taxanaha ah si loola socodsiiyo haddii maqalkiisa, makarafoonkiisa, webcam-kiisa, dib u soo celinta fiidiyaha, nidaamka qoraalka u beddela hadalka isku xirnaantu ay si sax u shaqeynayaan. Haddii u ardaygu wax dhib ah ka helo hardware-kiisa waa in uu la xiriiraa macallinkiisa si uu uga cilad bixinta dhibka jira ka hor imtixaan qaadashada meesha fog la joogo.

5. **Miyuu ilmahaygu awoodi doonaa in uu caawimaad ka helo qof haddii uu hayo su'aal muddada imtixaan qaadashada meesha fog la joogo?**

   Inta badan macallinka ilmahaaga ayaa qaadi doona imtixaanka. Si kastaba ha ahaatee, duruufaha qaarkood dugsiyada ayaa yeelan doona kormeere imtixaan oo kale oo la heli karo.

   - Haddii aad saxiixday Foomka Oggolaanshaha Imtixaan Qaadashada Meesha Fog La Joogo oo aad oggolaatay in webcam-ka la loo isticmaalo imtixaan qaadashada meesha fog la joogo, ardayda ayaa awoodi doona in ay arkaan oo maqlaan macallinkooda. Haddii ilmahaagu qabo su'aalo ama uu uga baahan yahay caawimaad macallinkiisa marka la qaadanayo imtixaan la joogo meel fog, wuxuu baran doonaa sida loo weydiisto caawimaad. Nidaamka imtixaan qaadashada meesha fog la joogo dhexdiisa, wuxuu weydiisan karaa wada hadal fool ka fool ah oo uu la yeesho macallinkiisa ama isaga oo muuqaal

ahaan "fartiisa u taaga." Macallinku wuxuu awoodi doonaa in uu arko codsigiisa caawimaada oo wuxuuna kaga jawaabi doonaa nidaamka imtixaan qaadashada meesha fog la joogo isaga oo isticmaalaya kulanka dhanka fiidiyowga ah ama kulanka shaashad wadaaga. Taageerada dhanka wada sheekaysiga 'chat' ayaa sidoo kale la helayaa.

- Haddii aadan saxeexin Foomka Oggolaanshaha Imtixaan Qaadashada Meesha Fog La Joogo oo bixinaya oggolaanshaha webcam-yada si loogu isticmaalo imtixaan qaadashada meesha fog la joogo, ardaydu waxay waqti kasta farriin 'chat' u diri karaan macallinkooda, inta lagu jiro imtixaanka ELA, xisaabta, sayniska, ama ELPA si ay taageero u weydiistaan.

6. **Maxaa dhacaya u haddii ilmahaygu u baahdo biririf inta lagu jiro imtixaan qaadashada meesha fog la joogo?**
Ardaydu waxay codsan karaan biririf haddii ay uga baahdaan imtixaan qaadaha ka hor inta aanay hakin 'pausing' imtixaankooda ama aanay qaadan birirf. Haddii uu macallinku ama ardaygu hakiyo 'pauses' imtixaanka, ardaygu wuxuu u baahan doonaa in uu soo galo to 'log into' nidaamka mar labaad marka uu soo noqdo. Wuxuu ku soo noqon doonaa isla goobtii uu ka joogay imtixaanka oo wuxuuna dib ugu bilaabi doonan imtixaan qaadashada hadba sida loogu baahdo.

7. **Maxaa ku dhacaya imtixaanka ilmahayga iyo jawaabihiisa haddii khadka ku xiraantayada internet-ku lumo inta lagu jiro kulanka imtixaan qaadashada meesha fog la joogo?**
Haddii uu ilmahaaga ka lumo khadka ku xirnaanta internet-ka inta uu ku jiro imtixaan qaadashada meesha fog la joogo, imtixaanka ayaa si toos ah loo hakinayaa, iyada oo macallinkana la ogeysiinayo. Jawaabaha ilmahaaga ayaa si toos ah loo keydinayaa ilaa heerkii u uku xirnaanshaha lagu lumiyay. Marka ku xirnaanta internet-ku soo noqoto, ilmahaagu waxa uu u baahan doonaa in uu mar kale si rasmi ah u soo galo 'log in' si u sii wato qaadasha imtixaanka.

8. **Maxay yihiin agabyada uu ardaygu u baahan doono, ee dheer aaladda, marka la joogo waqtiga imtixaanka?**
Warqada garaafka waa in la siiyaa ardayda fasallada 6 - 8 ee qaadanaya imtixaanada Xisaabta. In kasta oo jadwallada curiyayaashu ay ku dhex jiraan nidaamka bixinta imtixaanka ee ardayda qaadanaysa imtixaanka Sayniska ee fasallada 8 iyo 11, ardayda ayaa la siin karaa nuqul warqad ah. Nuqul ayaa ayaa laga helayaa bogga internet-ka ee Ilaha Imtixaan Qaadista ee ODE, ama waxaa laga codsan karaa macallinka ilmahaaga. Haddii laga heli karo jawi la kala joog meel fog, sameecadaha dhegaha ayaa laga yaabaa in ay bixiso fursad lagu dhimo wax mashquulinta.

9. **Ilmahaygu wuxuu u isticmaalaa qorshayaal loogu talagalay waxbarashada iyo imtixaanada kale ee macallinku siiyo ilmahayga. Miyay qorshayaashani jiri doonaan inta lagu jiro kulanka imtixaan qaadashada meesha fog la joogo?**
Taageerooyinka iyo qorshayaasha loogu talagalay ardayda loogu talagalay Barnaamijka Waxbarashada Shakhsi Ahaaneed (IEP) ama Qorshayaasha Qaybta 504 ayaa la helayaa inta lagu jiro imtixaan qaadashada meesha fog la joogo. La tasho macallinka ilmahaaga haddii aad hayso su'aalo gaar ah oo ku saabsan waxa ay yihiin taageerooyinka ku jira nidaamka imtixaan qaadista iyo taageeroyinka aan ku jirin ee uu heli karo ilmahaaga.

10. **Ilmahaygu wuxuu qabaa. Sidee buu awood ugu yeelan karaa in uu imtixaan ku qaato guriga haddii uu u baahan yahay in uu qof u akhriyo su’aalaha imtixaanka? U baahan yahay waqti dheeraad ah? Ama u baahan yahay qorshayaal kale?**
Ku dhawaad dhammaan taageerooyinka iyo qorshayaasha la qoondeeyay ee lagu bixiyo jawiga imtixaan qaadashada shakhsi ahaaneed ayaa sidoo kale lagu bixin karaa guriga inta lagu jiro imtixaan qaadashada meesha fog la joogo. Si kastaba ha ahaatee, qorshayaasha qaarkood, sida qof wax akhriye ah ama qoraal qaadanaya, waa in shakhsi ahaan loo bixiyaa. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan taageerooyinka iyo qorshayaasha la qoondeeyay ee la heli karo ee loogu talagalay imtixaan qaadashada meesha fog la joogo, la xiriir macallinka ilmahaaga ama dugsiga. Haddii dugsigu aanu awoodin in uu ku bixiyo taageerada loogu baahan yahay jawiga imtixaan qaadashada meesha fog la joogo, wuxuu soo jeedin karaa sameynta qorshe imtixaanka la iskaga qaato shakhi ahaan.

11. **Miyuu qof ilaalin/fiirin doonaa ilmahayga inta lagu jiro imtixaanka? Miyaan ilmahayga la joogi karaa qolka inta uu qaadanayo imtixaan qaadashada meesha fog la joogo?**
Xiriirka ka dhexeeya ardayga iyo macallinka ayaa si adag loo xakameeyaa. Qofka kaliya ee ay tahay in uu joogo meesha inta lagu jiro kulanka imtixaan qaadashada meesha fog la joogo ayaa ah imtixaan qaadaha. Ilmahaaga ayaa awoodi doona in uu la xiriiro oo taageero weydiiysto imtixaan qaadaha. Duubista lagama sameeyo fiidiyow kasta inta lagu jiro kulanka imtixaan qaadashada meesha fog la joogo, marka laga reebo duubista wixii maqal ah ee loogu baahan yahay qaybta hadalka ee qiimeynta aqoonta Luqadda Ingiriisiga ee loogu tagalay ardayda ka qayb qaadanaysa imtixaanka.

Waalidiinta/mas’uuliyiinta ayay dhici kartaa in ay u baahdaan in ay ka caawiyaan ardayda yar yar nidaamka gelitaanka ‘log in’ iyo hubinta makarafoonka, sameecadaha, iyo webcam-ka, laakiin waalidiinta/mas'uuliyiinta MA AHA in ay ku lug yeeshaan caawin, tilmaamid, ama taageero loogu talagalay imtixaanka oo la siiyo ardayga inta ardaygu sida firfircoon uu u qaadanayo imtixaan.